

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 6aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2018

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2018

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2018

**XEERKA DHAQANGALINTA HABRAACA HESHIISYADA
DOWLADDA FEDERAALKA**

Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Markuu Arkay: Qodobada 99^{aad} iyo 100^{aad} ee Dastuurka ku-meel-gaarka ah,

Markuu Arkay: Qodobada 4^{aad}, 5^{aad} iyo 6^{aad} ee Xeerka Maamulka ee Lr.. 14 ee 01/05/1965.

Markuu Arkay: Qodobada 8^{aad}, ee Xeerka Lr. 2 ee 29/12/1961

Markuu Garwaaqsaday: Inay lagama maarmaan tahay ku dhaqanka shuruucda maamulka dalka, si loo xaqiijiyo sarraynta sharciga.

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in heshiisyada ay galayso Dowladda Federaalka yeeshaan habraac isku mid ah, si ay heshiisyadu u noqdaan kuwo iswaafaqsan oo aan iska hor imaanayn, loona ansixiyay qaab isku mid ah.

Waxa uu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Heshiisyada Dowladda Federaalka la gelayso Dalal, Shirkado ama Hay’ado Ajnabi ah

1. Waxaa ka reeban Wasaaradaha iyo Hay’adaha kale ee Dowladda Federaalka in ay heshiis si toos ah ama si dadban ula galaan dalal, shirkado ama hay’ado ajnabi ah, iyada oo aan la raacin talaabooyinka ku cad farqadda 2^{aad} ee qodobkan.

2. Hashiisyada lala gelayo dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah waa in la horgeeyo Golaha Wasiirada ka dib marka la soo marsiiyo tallaabooyinka soo socdo:-
 - a) Waa in Heshiisyada lasoo marsiiyaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda waaxdeeda Sharciyada iyo heshiisyada caalamiga ah
 - b) Ka dib mark ay Wasaaraddu hubiso in heshiisku waafaqsan yahay Shuruucda iyo siyaasadda dalka, waa inay Wasaarada Arrimaha Dibaddu u gudbisaa Garyaqaanka Guud ee Dowladda Federaalka;
 - c) Garyaqaanka Guud waa inuu Xukuumadda talo-bixin ka siiyaa sharcinimada heshiiska iyo weliba hay'adaha Dowladeed ee awoodda u leh saxiixyada iyo ansixinta heshiiskaas.
 - d) Talada Garyaqaanka Guud kaddib, waa in oggolaansho qoraal ah laga helaa Ra'iisul Wasaaraha inta aan la saxiixin heshiiska, kaddibna heshiiska la horgeeyaa Golaha Wasiirrada

Qodobka 2aad

Heshiisyada ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda Federaalku la gelayaan shirkado ama hay'ado waddani ah, waa in la waafajiyo habraaca ku xusan Qodobka 8^{aad} ee Xeer Lr. 2 ee 29/12/1961.

Qodobka 3aad

Waajibnimada Qodobka Feejignaanta

Heshiisyada ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda Federaalku gelayaan waa in uu ku jiraa qodob si cad u sheegaya in heshiiskaasi waxba-kamajiraan yahay haddii uu baalmaro habraaca uu tilmaamayo sharciga dalka ee la xiriira dhaqangalnimada heshiisyada ay Dowladdu qaybta ka tahay, kaas oo ka horreeyey heshiiska.

Qodobka 4aad

Kaydinta Heshiisyada

Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxaa la dhigayaa nuqulka heshiis kasta oo oo Dowladdu la gasho dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah. Xafiiska Garyaqaanka Guud, Xafiiska Hantidhawraha JFS iyo Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha JFS waxaa mid walba la dhigayaa nuqulka heshiis kasta oo Dowladdu la gasho dalal, shirkado ama hay'ado ajnabi ah iyo kuwa wadaniga ahba.

Qodobka 5aad

Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalku, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.


Mudane Hussen Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



The seal is circular with the text 'JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA' at the top, 'XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA' on the left, and 'OFFICE OF THE PRIME MINISTER' at the bottom. In the center is the coat of arms of Somalia.

